DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMINSTRATION (DDA)

# Heshiiska Meelaynta Iskaaga-ah (VPA) Loogu Talagalay Ilmaha ama Dhalinyarada Leh Naafonimada La Xiriirta Koritaanka

## Voluntary Placement Agreement (VPA) For Child or Youth With Developmental Disabilities

Kani waa heshiis u dhaxeeyo Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA) iyo waalidka / wakiilka sharciga ah ee looguna talogalay Adeegyada Meelaynta Iskaaga-ah (VPS) ee khuseeya:

| MAGACA CUNUGA (HORE, DHEXE, DAMBE) | TAARIIKHDA DHALASHADA | LAMBARKA AQOONSIGA DDA |
|---|---|---|
| | | |

Saxiixidda heshiiskan, **DSHS / DDA iyo waalidka(waalidiinta) / wakiilka (wakiilada) sharciga ah ee cunuga waxay oggol yihiin in:**

a. Cunuga uu ka yar yahay 18 uuna leeyahay naafonimada la xiriirta koritaanka sida lagu qeexay sharciga RCW 71A.10.020 (""Naafonimada la xiriirta koritaanka" waxaa loola jeedaa naafonimo lagu sifayn karo naafonimo maskaxeed, maskax suux, qallal, maskax dhimanaansho, ama cudur kale oo dareemayaasha la xiriira ama xaalad kale ee shakhsiga oo uu oggaadey xog-hayaha in uu si dhow ula xiriiro naafonimo maskaxeed ama in uu u baahanayo daaweyn la mid ah midda loogu baahan yahay shakhsiyaadka leh naafonimo maskaxeed, taasi oo naafonimada ka dhalaneysa kahor inta shakhsiga uusan gaaran da'da sideed iyo tobbanaad, taas oo socotay ama la fillan karo in ay u socoto si aan xad lahayn, iyo taasi oo ku abuuraysa xaddayn badan shakhsiga.) iyo

b. Waalidka/wakiilka sharciga ah wuxuu hayaa cunuga mana jiraan arrimo aan la xalinin oo ah ku xadgudub iyo dayacid aysan go'aan wali ka gaarin Maamulka Carruurta iyo

c. Meelayn guriga-dibaddiisa ah oo ay ku jirto danta ugu fiican ee cunuga ayna kaliya sabab u tahay naafonimada la xiriirta koritaanka ee cunuga.

Ma jirtaa sabab lagu aaminayo in cunuga uu leeyahay dhaxal hinddi? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay haa tahay, raac tilmaamaha ku qoran Buuga Isticmaalka Daryeelka Cunuga Hinddida. Ha isticmaalin foomkan haddii ay jirto sabab lagu aaminayo in cunuga uu yahay: 1) xubin ka tirsan qabiil hinddi oo si dowladda dhexe ahaan loo aqoonsadey; ama 2) u qalmo xubinnimo qabiil si dowladda dhexe ahaan loo aqoonsadey oo ay waalidiinta dhaley cunugana ay xubin ka yihiin qabiilka. Fasaxyada iskaaga-ah ee meelaynta daryeelka korineed ansax uma aha carruurtan hinddida haddii ogolaanshaha uu ku hor saxiixo waalidka garsooraha maxkamadda sare ee dhallaanka ama qabiilka mooyaane in ka badan toban (10) maalmood kadib dhalashada cunuga iyo in ogolaanshada uu ansixiyo garsooraha. Isticmaal Oggolaanshaha Meelaynta Daryeelka Koriinka ee Waalidka Ilmaha Hinddida ama Hayaha Hinddida ah.

**Waalidka / wakiilka sharciga ah wuxuu oggol yahay:**

Waxaan si iskaa-ah u oggolahay in cunuga xagga sare lagu soo magacaabey lagu meeleeyo daryeelka iyo in uu hoos imaado ilaalinta DSHS/DDA. **Waxaan xafidayaa haynta cunugayga.** Waxaan haysanayaa awoodda aan ku oggolaanayo qalliinka aan degdega ahayn iyo daryeelka caafimaadka ee caadiga ah, oggolaansho guur, in lagu qoro ciiddanka qalabka sida, iyo in aan u sameeyo go'aanada sharciga muhiimka ah ee kale cunugeyga. Waxaan oggolaansho u siinayaa wakiilka lacagta-qaata ee la oggolaaday in uu maareeyo wixii dheefo ah ee cunugeyga xaq-u leeyahay in uu qaato iyo in uu u isticmaalo deeqdaasi lacageed in uu ku bixiyo kharashaadka daryeelka iyo adeegyada la siiyay cunugeyga (eeg Bayaanka Dacwoodaha ama Qofka Kale). Waxaan fahansanahay in heshiiskan uu ku dhammaanayo codsigeyga qoran. Waxaan sidoo kale oggolahay oona fahansanahay in cunugeyga la iigu soo celinayo 72 saacadood gudahooda kadib marka DDA ay hesho codsiyo qoran haddii cunugeyga lageeyo meel ku hayn ayadoo la higsanayo sharciga RCW 13.34.050 ama 26.44.050 mooyaane, lagu meeleeyo daryeel hooy ayadoo la higsanayo sharciga RCW 13.34.060 ama lagu meeleeyo daryeel korineed ayadoo la higsanayo sharciga RCW 13.34.130. **Waxaan sidoo kale fahansanahay in sababo la xiriira in aan haysto haynta cunugeyga, haddii meelaynta cunugeyga ay carqaladeyngasho oo aana la heli karin meelayn kale oo ku habboon, waa in aan ku celiyo cunugeyga gurigeyga ilaa meelayn ku habboon loogu sameynayo.** Waxaan oggolaasho u siinayaa DDA oo aan oggolahay in ay sameyso waajibaadyadan iyo mas'uuliyadahan soo socda sida lagu sharxay xagga hoose:

1. In ay ku wargeliso DDA cinwaankegyga iyo taleefoon lambarkeyga hadda la joogo;
2. In aan kala qaybgalo iyo in aan ula shaqeeyo si wada-shaqayn leh shaqaalaha DDA iyo shakhsiyaadka daryeelaya cunugeyga go'aano gaaridda;
3. In aad sii wado xiriirka shakhsi ahaaneed ee aan la leeyahay cunugeyga iyo in aan ka qaybqaato in si wadajir ah loo sameeyo iyo in la raaco "qorshaha barbaarinta la wadaago" ee daryeel bixiyaha shatiga ahaysta;
4. In aan siiyo DDA xogta waxbarasho, bulsho, jir ahaaneed, dabeecadeed, dambiga la xiriirta, iyo caafimaad si loo xaqiijiyo taageerada daruuriga ah ee ku habboon cunugeyga;
5. Si wadashaqayn loogala yeesho DDA helitaanka dheefaha dhammeystiran ee ilmahayga ayadoo loo marayo Maamulka Damaannada Bulshada. Waxaan fahansanahay oona oggolahaya deeqahan (oo sidoo kale ka mid noqon kara ilmaha iyo/ama taageero korsashada) waxaa loo isticmaalaa bixinta lacagta kharashaadka hoyga iyo raashiinka aasaasiga ah ee cunugeyga;
6. Si aad u sii wadid degganaanshaha gobolka Washington ama mid ka mid ah magaalooyinka xadka gobolka ku yaala ee la aqoonsan yahay sida lagu muujiyay WAC 182-501-0175;
7. In aan sii wado ku diiwaangelinta cunugeyga caymiska ilkaha iyo caafimaadka khaaska ah (haddii la adeegsan karo); iyo
8. In aan siiyo DDA nuqul ah qorshaha barbaarinta la wadaago oo ay maxkamadda amartey iyo/ama qaraarka furiinka marka la adeegsan karo.

**<u>DDA waxay oggolaanaysaa marka meelaynta ay dhacdo</u>:**

1. In ay ku meelayso cunuga guri ama xarun ruqsad u haysato taas oo buuxisa baahiyada dhaqanka la xiriirta iyo midda shakhsi ahaaneed ee cunuga sida ugu suurtagalsan;
2. In ay la sameyso waalidka / wakiilka sharciga ah qorshaha taageerada shakhsi ahaaneed ee loogu talagalay cunuga iyo ay siiso adeegyada la heli karo ee ku habboon;
3. In ay kugu caawiso in aad sii wadatid mas'uuliyadahaaga iyo xuquuqahaaga sidii waalid ahaan;
4. Si aad u heshid go'aanka maxkamadda sannadlaha ah in meelaynta guriga dibaddiisa ah ay ku jirto danta ugu fiican ee cunuga iyo in kaliya ay ku salaysan tahay naafonimada la xiriirta koritaanka ilmaha; iyo
5. Si waalidka / wakiilka sharciga ah loogu wargeliyo daryeelka ilmaha, meelaynta iyo xaalka caafimaadka.

**<u>Xaddidaadyada heshiiskan</u>:**

1. DSHS waxaa laga yaabaa in ay joojiso heshiiskan wakhti kasta ayadoo ogeysiis qoran la siinayo waalidka, ama ayadoo bilaabaysa dacwad maxkamad;
2. Heshiiskan wuxuu bilaabanayaa ____________________.
3. Cunuga kuma jiri karo meelaynta in ka badan 180 maalmood haddii, kahor wakhtigaasi, Maxkamadda Dhallaanka ay dib-u hubin ku sameyso meelaynta mooyaane si ay u go'aamiso haddii sii wadidda ay ku jirto danaha ugu fiican ee cunuga. Waxaa lagugu soo wargelinayaa dhammaan taariikhhaha dhageysiga. Haddii maxkamadda ay go'aamiso in meelaynta ay sii socoto aysana ku jirin danaha ugu fiican ee cunuga, heshiiska meelaynta waa la dhammaynayaa.
4. Heshiiskan wuxuu baddalayaa wixii VPA hore ah ee ay saxiixeen dhinacyada.

| SAXIIXA WAALIDKA / WAKIILKA SHARCIGA AH | TAARIIKH |
|---|---|
| SAXIIXA WAALIDKA / WAKIILKA SHARCIGA AH | TAARIIKH |
| SAXIIXA SHAQAALAHA BULSHADA EE DDA / TAKHASUSLAHA ADEEGGA BULSHADA | TAARIIKH |

Aniga oo ah, ________________, (QOR MAGACA WAALIDKA) waxaan caddaynayaa anigoo hoostagaya ciqaabta dhaarbeeneedka in waxyaabahan soo-socda ay yihiin wax run ah oo sax ah, in aan leeyahay haynta sharciga ah ee cunuga, ama cunuga wuxuu iila degan yahay wakhtiga badankiisa sida lagu qeexay qorshaha barbaarineed, ama waxaan leeyahay mas'uuliyadda ayadoo la eegayo qorshaha barbaarineed si loo fasaxo heshiiskan.

__________________________________ Markay ahayd ______________ taariikdhu ______________________________
SAXIIXA WAALIDKA / WAKIILKA SHARCIGA AH TAARIIKH DEGAANKA (MAGAALADA, GOBOLKA)

Washington State Department of Social & Health Services
DDD Division of Developmental Disabilities

# Bayaanka Andacoodeha ama Qofka Kale

## Statement of Claimant or Other Person

| MAGACA MURUQ MAALKA, QOFKA ISKIISA-U SHAQEYSTA, AMA ANDACOODEHA SSI | LAMBARKA DAMAANNADA BULSHADA |
|---|---|
| MAGACA QOFKA SAMEYNAYA BAYAANKA (HADDII UU YAHAY QOF AAN AHAYN MURUQ MAALKA, QOFKA ISKIISA-U SHAQEYSTA, AMA ANDACOODEHA SSI) | CILAAQAADKA UU LA LEEYAHAY MURUQ MAALKA, QOFKA ISKIISA-U SHAQEYSTA, AMA ANDACOODEHA SSI |

Fahmidda in bayaankan loogu talagalay isticmaalka Maamulka Damaannada Bulshada, waxaan halkaan ku caddaynayaa in:

**Waxaan caddaynayaa anigoo hoostagaya ciqaabta dhaarbeeneedka in aan baarey dhammaan xogta ku qoran foomkan, iyo wixii bayaano ama foomam ah ee raaca, waana run sax ah sida ugu fiican aqoonteyda. Waxaan fahansanahay in qof kasta oo si oggaal ah u bixiya bayaan been ah ama khayaano ku saabsan xaqiiqda walax ku jira xogtan, ama ay u keento in qof kale uu sameeyo sidaasi, in uu sameynayo dambi lagana yaabo in loo diro xabsi, ama uu wajaho ciqaabo kale, ama labaduba.**

**Saxiixa Qofka Sameynaya Bayaanka. Khad ku qor.**

| SAXIIXA WAALIDKA / MAS'UULKA (MAGACA HORE, XARAFKA BILOWGA DHEXE, MAGACA DAMBE) | TAARIIKH (BIL, MAALIN, SANNAD) |
|---|---|
| SAXIIX HALKAN ▶ | LAMBARKA TALEEFOON (KU DAR KOODHKA DEEGAANKA) |
| CINWAANKA BOOSTADA (LAMBARKA IYO WADDADA, LAMBARKA QURIGA DABAKHA, SANDUUQA BOOSTO, JIDKA MIYIGA) | |
| MAGAALO IYO GOBOL | KOODHKA DEEGAANKA |

| SAXIIXA WAALIDKA / MAS'UULKA (MAGACA HORE, XARAFKA BILOWGA DHEXE, MAGACA DAMBE) | TAARIIKH (BIL, MAALIN, SANNAD) |
|---|---|
| SAXIIX HALKAN ▶ | LAMBARKA TALEEFOON (KU DAR KOODHKA DEEGAANKA) |
| CINWAANKA BOOSTADA (LAMBARKA IYO WADDADA, LAMBARKA QURIGA DABAKHA, SANDUUQA BOOSTO, JIDKA MIYIGA) | |
| MAGAALO IYO GOBOL | KOODHKA DEEGAANKA |

Markhaatiyaasha waxaa KALIYA loo baahan yahay haddii bayaankan uu saxiixo calaamadda (X) ee xagga kor. Haddii uu saxiixo calaamadda (X), labada markhaatiyaal ee saxiixaya oo garanaya shakhsiga ku waajibta in uu saxiixo xagga hoose, ayagoo bixinaya cinwaanadooda oo dhammeystiran.

| 1. SAXIIXA MARKHAATIGA | 2. SAXIIXA MARKHAATIGA |
|---|---|
| CINWAANKA (LAMBARKA IYO WADDADA, MAGAALADA, GOBOLKA, IYO SUMADDA DEGAANKA) | CINWAANKA (LAMBARKA IYO WADDADA, MAGAALADA, GOBOLKA, IYO SUMADDA DEGAANKA) |